Kanton Zürich
Direktion der Justiz und des Innern
Fachstelle Integration

# FI-Bulletin

Abriil 30, 2020

## Fayruuska Corona: Xarumaha la talinta iyo Qadadka Taleefoonada

Gacaliye Sir ama Madam

Xarumaha la talinta ee Gobolka Zürich wali sidoodi ayee kuugu shaqeeynayaan Taleefoon ahaan inta lagu jiro marxalada ee Corona. Halkaan ayaad ka heleysaa Xarumaha la talinta ee ugu muhiimsan gobolka Zürich iyo Warbixinadooda ku aadan mowduucyada iyo luqadaha ey kugu siin karaan talooyinka.

## Xarumaha la talinta ee ku saabsan Magareeshanka

→ **Infodona: 044 412 84 00**

Xarunta la talinta soogalootiga ee Magaalada Zürich waxey ku bixisaa warbixinada 16 Luqadood: Jarmal, albaanish, Carabi, Ingiris, Faransiis, Talyaani, koroaati, Bortiqiis, Serbish, Isbaanish, Tamilish, Turki, Slowaaki,Ruush, Kurdi(sooran),iyo Turkamesi. Infodona waxeey bixisaa talooyin lacag la`aan ah kuna saabsan mowduucyadaan:

Warbixino quseeyaan talabooyinka la xiriira Corona, Kunoolaashaha Zürich, Guurka iyo Qoyska, Xaqa,Dhaqaalaha, Shaqada iyo Caafimaadka.

→ **Xarunta la talinta soogalootiga ee magaalada Winterthur: Telefon 052 267 36 93**

La taliyaasha ku hadla afka hooyo waxeey ku wargaliyaan soogalootiga mowduucyada ku saabsan isdhexgalka iyo shuruudaha ka hortaga ee Corona. Waxaana loogu tala galay dadka dagan Winterthur iyo nawaaxigeeda waana lacag la'aan. Waxaana lagu siiyaa talada luqadahaan sida:

albaanish,carabi,xabaashi,Bulgari,boosni,ingiris, talyaani,Kurdi, isbaanish, bortaqiis, serbis, kroaatis, masadooniya,Tigree iyo Turki .

→ **Xarunta caawinaada isdhexgalka magaalada Zürich: 044 412 37 37**

Xarunta caawinaada isdhexgalka ee magaalada Zürich waxeey kaa siisaa talooyin su'aalaha ku saabsan arimaha migreeshinka iyo isdhexgalka. Waxeena ku baxaan luqadaha: Jarmal, Ingiriis, Faransiis, Giriig, Talyaani, Bortaqiis iyo Isbaanish. Waxaana loogu talagalay kaliya dadka dagan magaalada Zürich.

→ **MIRSAH: 044 291 00 15**

Xaruntaan waxeey bixisaa Warbixinada ku saabsan su'aalaha Xaquuqda Migreeshinka iyo isdhexgalka sida (xuquuda joogitaanka,Dacwadaha keenista qoyska, Ogolaashaha Shaqada, Fiisooyinka  Qaadashada jinsiyada) Garyaqaano ku taqasusay ayaa ku siinaayaan talooyin quseeyaan  sharciyada shisheeyaha. Tala bixnta waa 50Fran/Saacadii waxaana lagu bixiyaa luqadaha:

Jarmal, Ingiriis, Faransiis, Kurdi, Isbaanish iyo Turki.

→ **ZüRAS: 044 415 62 26**

Xarunta la xiriirto ka hortaga midab takoorka iyo cunsurinimada ee Zurich(ZüRas) waxeey la talisaa dhibanayaasha la cunsuriyeeyo iyo la midab takooro xilaga Shaqada ama dariska ama xiliyada fasaxa,Laguna dhibaateeyo sababaha ku aadan meesha ay ka soo jeedaan,ama midabkooda,ama diintooda. Waxaana loogu talagalay dadka dagan Gobol Zürich waana bilaash. Waxaana lagu bixiyaa 14 Luqadood.

→ **SPAZ: 043 960 87 77**

Xaruntaan waxeey caawisaa soogalootiga an heysan sharci sax ah ay bulshada kula noolaadaan. Waxeey si bilaash ah u siisaa talooyinka ku saabsan bulshada iyo sharciyada. Luqadaha eey ku bixiso waa:

Jarmal, Faraansiis,Ingiriis iyo Isbaanish.

# Talabixin guud

→ [SOS-Beratung - Ons Wadahadal:] **044 360 28 53**

La taliyaasha arimaha bulshada ku shaqeeya waxeey la taliyaan dadka ku jira xaaladaha adag, kuwaasoo u baahan caawinaad degdeg ah. Kumana xirna qofka jinsiyadiisa iyo sharciga uu haysto. Waxaana iska leh fursadaan kaliya dadka dagan Gobolka Zürich. Tala bixinta waa lacag la'aan, waxaana lagu bixiyaa luqadahaan:

Jarmal. Faransiis, Ingiriis, Talyaani iyo Isbaanish.

→ [Caritas Sozial- und Schuldenberatung - Caritas talo bixin bulsheed iyo deyn:] **044 366 68 28**

Shaqaalaha bulshada ee Caritas Zurich ayaa talo ka siiya dadka ka soo jeeda gobolka Zurich ee haysta lacagta yar, ku nool saboolnimada ama deyn ku leh.Wadatashiyadu waa lacag la'aan waxaana lagu qabtaa luqada Jarmalka.

# Tala bixinta ku saabsan arimaha Corana

→ [Xarunta qadka talefoonka tala bixinta ee Qaxootiga:]

La taliyaasha ku hadla afka hooyo waxeey bixiyaan Warbixinada cusub ee arimaha ganacsiga uu saameeyey Corona oo hada jira. Waxeey ku bixiyaan 11 Luqadood:

Badini, Daari, Farsi, Urdu, Ingiriis, Faransiis, kurmaanji, Turki, Tamiili iyo Tigree. Dadka qaxootiga ah ee Gobolka Zürich waa u lacag l'aan tala bixin taas.

→ [HEKS teleefoonka cawinaada:] **044 360 88 55**

La taliyaasha arimaha bulshada oo xirfad leh waxeey siiyaan talooyin dadka xiliga marxalada Corona howl maalmodkooda ku adkaato,waxeyna kula talisaa si taleefoon ah. Fursadaan waa lacag la'aan waxaana loogu talagalay dadka dagan Gobolka Zürich.

Telefoonka waxaa looga jawaabayaa **0800 266 785 10** luuqadood:

Albaaniyaan, Carabi, Boosniya / Croatian / Serbian, Kurdi, Farsi, Boortaqiis, Isbaanish, Taamil, Tigrinya, Turkiga.

→ [Tababarka Corona:]

Tababaryaal xirfadeysan, iyo Dhexdhexaadiyaal iyo Kuwa Cilmi nafsiga ku taqasusay waxeey la taliyaan dadka eey ku adagtahay marxalada hada jirta oona u baahan wadahadalo. Kuwaasoo noqon karo dhibanayaal, Qaraabada, Shaqaalaha Caafimaadka iyo sidoo kale Waalidiinta iyo Qoyska.

Talooyinka waxaa lagu bixiyaa taleefoon iyo luqadaha:Jarmal, Faraansiis iyo Ingiriis. Waana lacag la'aan ilaa dhamaadka bisha lixaad 2020.

# Tala bixino ku saabsan su'aalaha Caafimaadka

→ [Taleefoon nambarka Dhaqaatiirta:] **0800 33 66 55**
24-Saacadood nambarka degdega ah ee Feyruuska Corona.

→ [MEDITRINA:] **044 360 28 72**

Meditrina waa Xarun caafimaad oo loogu talagalay dadka sharci la'aanta ku jooga Iswiiska,oona heysan ceymiska caafimaadka. Tala bixinta iyo daryeelka guud ee Caafimaadka ee Meditrina waa lacag la'aan. Waxaa lagu bixiyaa luqadaha:

Jarmal, Ingiriis,Faraansiis,talyaani,Bortaqiis iyo Isbaanish. Hadeey Baaritaanada iyo daaweenta noqoto in meel kale lagu sameeyo waa lacag.

# Qadadka Taleefoonada

→ [Qadka Taleefonka ee Feyruuska Corona:] **0800 044 117**
Qadka taleefoonka ee warbixinta Gobolka Zürich ku saabsan su'aalaha Xanuunka Corona, waxaa la helaa maalin walbo 7 ila 23 habeenimo.

→ [Qadka taleefoonka warbixinta Feyruuska Corona:] **058 463 00 00**
Qadka taleefoonka 24 saacadood ee wasaarada caafimaadka oo bixiso warbixino ku saabsan xaalada Carona ee Iswiiska. Qadka taleefoonka laguma bixiyo Talo caafimaad.

FI-Bulletins waxaa laga heli karaa [bogagga shabakadda] xafiiska is-dhexgalka bulshada.